Xafiiska Kormeeraha Guud
Dr. Drew Echelson, Ku simaha Kormeeraha Guud
Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street, 5th Floor
Roxbury, Massachusetts 02119
860-916-6015
dechelson@bostonpublicschools.org
www.bostonpublicschools.org

Ku socota: Boston Public Schools School Committee Members
Ka: Ku simaha Kormeeraha Guud Dr. Drew Echelson
Taariikhda: Ogosto 29, 2022
Khusaysa: Furitaanka Dugsiyada Dadweynaha Boston SY22-23

Warqada ogaysiiska waa dulmar guud oo ku saabsan Sannad-dugsiyeedka caawa 2022-2023 soo bandhigida Ku noqoshada Dugsiga ee Guddiga Dugsiga. Wargalintayadu waxay xubnaha ka caawin doontaa inay fahmaan qorshayaasha aanu u dajinay bilawga adag ee sanad dugsiyeedka ee Dugsiyada Dadweynaha Boston (BPS) ardayda, qoysaska iyo shaqaalaha.

In kasta oo aan aaminsanahay in aan heli doono maalinta koobaad oo muhiim ah, walaacayada ugu weyn ayaa weli ah shaqaaleysiinta iyo gaadiidka, laakiin waxaan u soconaa jihada saxda ah. Horumarkayaga iyo qorshayaashayada dhinacyadan ayaanu idin kula socodsiin doonaa bandhigan. Waxaan sidoo kale kugu soo wargalin doonaa:

- **Shaqaalaha**
- **Gaadiidka**
- **Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada**
- **Xarumaha**
- **Qorshaynta iyo u Diyaar garawga COVID-19**
- **Meeleynta Ardayga**
- **Wacyigelinta iyo Ka qaybgalka**
- **Tacliimeed**

Maadaama bandhigaani uu ku kooban yahay wargalino cusub oo ku saabsan shaqooyin kala duwan oo waaxyaha oo socda si ay ugu diyaar garoobaan furitaan guul leh ee dugsiyada, waax kastaa waxay ku dari doontaa tixgalinta sinnaanta muhiimka ah iyo xeeladaha warbixintooda waaxda ee faahfaahsan mustaqbalka halkii ay dadaalkaas isugu geyn lahaayeen hal qoraal ee saameyn sinaanta.

Shaqaalaha
Darawalada baska iyo kormeerayaasha, shaqaalaha adeegga cuntada iyo qaar ka mid ah xirfadlayaasha caafimaadka ayaa ah boosaska ugu sarreeya ee aan u baahanahay inaan buuxinno. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan dhiirigelino darawalka baska iyo boosaska kormeerayaasha baska iyo sameynta qorshooyin kadis ah si loo hubiyo in ardayda loo xilsaaray kormeerayaasha ay helaan adeegyada lagama maarmaanka ah.

Shaqaalaysiinta macalimiin saynis sare iyo macalimiinta ESLka ayaa iyana ahayd mid caqabad ah. Fadlan la soco in dhowr dugsi ay hadda ka banaan yihiin inta badan boosaska macallimiinta, laakiin degmadu waxay si dhow ula shaqaynaysaa dugsiyadan si ay u qorto shaqaalaha loo baahan yahay maalinta koobaad ee dugsiga.

Gaadiidka

Waxaan sii wadeynaa inaan ka faa'ideysano heshiiska gorgortanka Wadajirka ah ee aan la leenahay Ururka Darawaliinta, kaas oo siinaya fursado cusub oo si wanaagsan loogu adeego ardaydeena. Waxaan markasta ka shaqaynaa la hawlgalayaashayada Magaalada iyo MBTA si aan isaga kaashano oo aan u yareyno carqaladeynta inta lagu jiro xiritaanka khadka Orange ee aan horay loo arag ee gobolka, waxaanan sii wadeynaa hagaajinta hufnaanta hawlgelinta taas oo gacan ka geysan doonta in ardaydeenna ay dugsiga ku tagaan si badqab leh iyo waqtigii loogu talagalay. Kooxda Gaadiidka ee BPS waxay sii wadaan inay ka shaqeeyaan habaynta iyo shaqada baska, shaqaaleysiinta adeega macaamiisha, iyo diyaargarowga barxadda baska.

Adeegyada Cuntada iyo Nafaqada

Soo bandhigidayadu waxa ku jiri doona cusboonaysiinta iibiyahayaga cusub, Cuntooyinka Cusub ee Magaalada, iyo sidoo kale warbixin ku saabsan qorshayaashayada bixinta cuntada dugsiga iyada oo ay jirto shaqaale yaraan.

Xarumaha

Si loo xaqiijiyo sanad dugsiyeedka guul leh, mid kasta oo ka mid ah agabka dugsiyadeena waa inay ahaadaan kuwo badbaado leh oo soo dhawayn leh. Xagaagan, dugsiyadeenu waxa ay sameeyeen nadiifin qoto dheer iyo jeermis dil iyo sidoo kale horumarro badan oo gudaha iyo dibadda ah. Waxa kale oo aanu dhamaynay dhawr mashruuc oo dib u habayn dugsi ah, balaadhin iyo casriyeyn kale oo ay ku jiraan bannaanka iyo gudahaba sida musqulaha, goobaha laga soo galo, goobaha baabuurta la dhigto iyo garoommada ciyaaraha.

Meelaynta Ardayga/Wacyi-galinta iyo Hawlgelinta

Waxaan dib u eegi doonaa tirada meelaynta ardayga ee hadda iyo dadaalka wacyigelinta oo aan kuu soo sheegi doonaa diiwaangelinta ugu sarreysa degmada ee Ogosto. Laga bilaabo Ogosto 24, wadar dhan 50,980 arday ayaa laga diiwaan geliyay dugsiyada BPS. Tiradani way isbedbedeli doontaa markay ardaydu sii wadaan isdiiwaan galinta ama ka noqoshada. Wadarta diiwaangelinta rasmiga ah waxay diyaar noqon doontaa Oktoobar 1.

Waxaan sidoo kale sii wadnaa inaan u wacno qoysaska ku jira liiska sugitaanka ee dugsiyada leh kuraasta furan. Dadaalka wacyigelinta qoyska iyo bulshada ayaa socda waxaana ka mid ah horumarinta diiwaangelinta ardayda. Khadka Caawinta cusub ee BPS waa uu shaqaynayaa,

waxaana barnaamijka Tirinta Sannadlaha ee Carruurnimada Hore si buuxda u socdaa 30 dhacdo oo xaafadaha ah iyo Dabaaldegga magaalada oo dhan Talaadada, Ogosto 30.

BPS waxa kale oo ay martigelinaysaa laba kulan oo khadka tooska ah ee Ku laabadashada Dugsi ah si ay qoysaska u siiso fursad ay kula kulmaan Kormeeraha cusub oo ay wax badan uga bartaan sida aanu ugu diyaarinayno dugsiyo dhammaan ardaydeena. Kulamada waxaa loo qorsheeyay Khamiista, Seebteembar 1 6:00 galabnimo iyo Sabtida, Seebteembar 10 10:00 subaxnimo.

Qorshaynta iyo u Diyaar garawga COVID-19

Dhamaan kooxaha shaqaynaya ee BPS iyo wakiilada Guddiga Caafimaadka Dadweynaha Boston waxay kulmaan saddex maalmood usbuucii si ay u hubiyaan inaan ku soconno wadadii dhammaan qorshaheenna COVID-19 ee bilowga dugsiga. Qorshayntayadu waxa ka mid ah imtixaanada ardayda iyo shaqaalaha, qaybinta todobaadlaha ah ee imtixaanada guriga, baadhista calaamadaha, xarumaha tallaalka iyo waxbarashada, iyo siyaasadayada xirashada maaskarada. Waxaan sidoo kale diiradda saareynaa hubinta in dugsiyadu helaan tayada hawada iyo hawo siinta iyo hawlgalinta hawada sifeeyaasha iyo dareemayaasha tayada hawada.

Tacliimeed

Sagaalka gobol ee dugsiyadayada iyo maamulayaasha dugsiyadu waxay diyaar u yihiin inay ku soo dhaweeyaan ardayda ku soo laabta fasalka oo ay siiyaan taageerooyin barayaashayada oo leh Diirada Waxbarasho ee loo siman yahay.

Waxa kale oo aanu u diyaarinay taageero ardayda naafada ah iyo kuwa luuqadaha badan barta. Waxaan ka aasaasnay xarun ku meel gaadh ah oo kormeer ah oo ku taal Bariga Boston oo ah Newcomer Assessment and Counseling Centerwaxaanan hadda cusboonaysiinaynaa Nidaamkayaga Waxbarashada Gaarka ah iyo Buugga Habka. Heshiiska cusub ee gorgortanka wadajirka ah ee lala galay Ururka Macallimiinta Boston wuxuu noo ogolaanayaa inaan hore usi wadno adag oo fikir leh shaqadayada ka mid noqoshada. Waxaan ka warbixin doonaa aasaaska kooxdayada koobaad ee 20-25 dugsi kuwaas oo u abuuri doona qorshayaal ka mid noqoshada dugsiyadooda iyo Kooxaha Isku-dhafka ah ee Waxqabadka kuwaas oo wax ka qaban doona caqabadaha nidaamka ee nidaamkayaga si uu u noqdo mid ka mid ah dugsiyada gaarka ah.